



## Guddiga Agaasimeyaasha Warqadda Xaqiiqada Doorashada 2020

### **KOR KA EEGIDDA**

Warqaddaan waxay xoogga saartaa in ay soo koobto macluumaadka muhiimka ah ee ku wareegsan hawsha la xariirto habka doorashada ururka Powderhorn Park Neighborhood Association (PPNA) 2020 ee musharaxiinta guddiga. Tani waxaa ka mid ah xaq u yeelashada musharaxiinta guddiga iyo cod bixiyeyaasha.

### **XAQIIQADAHA DEGDEGGA**

- 1) Goormaa la dooran doonaan musharaxiinta si loo buuxiyo kuraasta ka banaan Guddiga Agaasimeyaasha PPNA?**
  - a. Cod bixinta Agaasimeyaasha waxaa la qaban doonaa lana xeri doonaa dhamaadka Shirka Sannadka PPNA (PPNA's Annual Meeting) taasoo loogu talogalay xubnaha guud ahaan ka tirsan.
  - b. Sharciyada u dagsan ururka waxay ogol yahiin cod bixinta hore iyo cod bixinta maqanaha.
- 2) Goormaa ayaa la qaban doonaa Shirka Sannadka PPNA (PPNA Annual Meeting)?**
  - a. Qamiis, 8<sup>da</sup> Oktoobar laga bilaabo 6:00 pm - 8:30 pm
  - b. Shirka sannadkaan waxaa lagu martigelin doonaa internetka, waxaana la adeegsan doonaa Zoom taasoo ugu wacan COVID-19.
  - c. Xubnaha bulshada loo ogol yahay waxay iska diiwaan gelin karaan Shirka Sannadka marka ay tagaan [www.ppna.org/annualgathering](http://www.ppna.org/annualgathering)
- 3) Maxay yahiin sharuudaha xaq u yeelashada ka-tirsanaanta xubnaha guud iyo adeegga gudiga PPNA?**
  - a) Waa in uu jiro ugu yaraan 16 sanno
  - b) Waa in uu daggan yahay ama waa in uu hanti ku leeyahay xaafadda, ama waa in uu ka shaqeeyo ganaci ama hay'ad ku taal xaafadda.
- 4) Sidee ayaad ku noqon kartaa musharaxa guddiga?**
  - a) Haddii laguu ogolaado, buuxi foomka magacaabidda guddiga ee ku qoran bogga internetka PPNA adiga oo taga [www.ppna.org/board-nomination-form](http://www.ppna.org/board-nomination-form)
  - b) Qofka wuxuu magacaabi karaa naftiisa, haddii uu xaq u yeesho, inta uu socdo Shirka Sannadka ee la qaban doono 8<sup>da</sup> Oktoobar marka la qaban doono "magacaabidda ay soo jeediyaan ka qeybgaleyaasha"
- 5) Goormaa lagu dhawaaqi doonaa xubnaha guddiga la doortay?**
  - a) Xubnaha guddiga cusub ee la doortay waxaa lagu dhawaaqi doonaa 5 pm (galabnimo) maalinta Jimcaha, 9<sup>ka</sup> Oktoobar. Tani waxay ogolaan doontaa waqtiga dheeraadka ah ee loo baahan yahay in lagu dhamaystiro xaqijintu ciwaaanka si loo siiyo ka-qeybgaleyaasha isku qora maalinta Shirka Sannadka kaddibna bixiya codkooda.

### **XAQIIQADAHA MUSHARAXA GUDDIGA**

- 1) Goormaa ayay xubnaha bulshada xaq u yeesha soo gudbin karaan foomka magacaabidda guddiga?**
  - a) Haddii aad xaq u yeelatid, kuwa daneeyo waxay soo gudbin karaan foomka magacaabidda laga bilaabo Luulyo ilaa 8<sup>da</sup> Oktoobar marka ay tahay 10 am subaxnimo. Qaar ka mid ah



## Guddiga Agaasimeyaasha Warqadda Xaqiiqada Doorashada 2020

maclumaadka ku qoran foomamkaan waxaa lagu darri doonaa warqadda cod bixinta internetka ee ururka.

- 2) Maxaa dhaca kaddib marka PPNA hesho foomka magacaabidda guddiga?**
  - a) Xubin ka tirsan shaqaalaha ururka ayaa emailka xaqijinta u dirla qofka la magacaabay kaddibna koobi u dirla Agaasimaha Fullinta PPNA si uu u bixiyo maclumaad dheeraad ah.
  - b) Kaddibna Agaasimaha Fullinta (Executive Director) ayaa soo jeediya soo koobidda taariikhda la xariirto soo gudbinta musharaxiinta si loo xasuusto. Waqtigaan waxaa kaloo la codsan doonaa sawir. Keenidda sawir waa wax leyska dhaafi karo.
- 3) Sidee ayay xubnaha bulshada ee xaqa u yeesha uga qeybgeli karaan haddii aysan soo gudbinin foomka magacaabidda?**
  - a) Inta uu socdo Shirka Sannadka, waqtii ayaa la qaban doonaa si "magacaabid looga helo dadka isu yimid." Waqtigaan, dadka waxay magacaabi karaan naftooda. Musharaxiintaan waxaa la siin doonaa fursad, sida loo siiyo dhamaan musharaxiinta, in ay muddo 2 daqiiqo ka hadlaan sababta ay u rabaan adeegga guddiga PPNA.
- 4) Intee kuraasta guddiga ayaa guud ahaan u banaan in ay buuxiyaan musharaxiinta guddiga loo ogol yahay?**
  - a) Guud ahaan, sannad kasta, guddiga waxaa ka banaan 6 kursi. Tani waxay muujisaa qodobada isku xiga guddiga ee ku qoran sharchiyada u dagsan PPNA. Marmar, waxaa dhici karto in ay banaan yahiin kuraas badan haddii aan weli la gaarin doorashada kursiga balse xubinta guddiga go'aan ku gaarto in aysan buuxinin muddada u hartay.
- 5) Talaabadee (Talaabadahee) la qaadaa si loo xaqijiyo xaq u yeelashada musharaxa guddiga**
  - a) Shaqaalaha PPNA waxay ogolaashada musharaxa guddiga ku saleyaan cinwaanka ku qoran foomka magacaabidda guddiga. Shaqaalaha ayaa xaqijiya in cinwaanka soo galo xuduudda xaafadda Powderhorn Park.
  - b) Inta uu socdo Shirka Sannadka, waxaa la xaqijin doonaa cinwaanka la ogol yahay lana xariira musharaxiinta magacaaba naftooda kana tirsan ka-qeybgaleyaasha si loo hubsado in cinwaanka soo galo xaafadda Powderhorn Park Neighborhood. Dadka la magacaabay waxay u baahan yahiin in cinwaankaan lagu soo dirro (a) brograamka gaarka ee ku jira Zoom ama (b) in loo diro xisaabta PPNA info@ppna.org inta uu socdo shirkha.
- 6) Musharaxiinta guddiga ma bixin karaan codkooda?**
  - a) Haa. Musharax kasta oo ka tirsan guddiga wuxuu dhiibin karaa codkiisa sida xubin guud oo loo ogol yahay kana tirsan PPNA. Tani waxaa ka mid ah u coddeynya qaar ka mid ah musharaxiinta u taagan dhamaan kuraasta banaan. Haddii xullahadaada warqadda cod bixinta ka badato tirada kuraasta la ogol yahay, warqadaada cod bixinta waa laga saari doonaa tirada.

### **XAQIIQADAHA COD BIXIYAH**

- 1) Yaa xaq u leh in uu codkiisa siiyo musharaxiinta Guddiga Agaasimeyaasha PPNA?**
  - a) Dhamaan xubnaha guud ururka ee loo ogol yahay waxay codkooda siin karaan musharaxiinta guddiga loo ogol yahay.
  - b) Xubinta guud PPNA ee xaqa u yeelata waxay la kullantaa waxaa soo socda:



**Guddiga Agaasimeyaasha**  
**Warqadda Xaqiiqada Doorashada 2020**

---

- i. Waa in uu jiro ugu yaraan 16 sanno
  - ii. Waa in uu daggan yahay ama waa in uu hanti ku leeyahay xaafadda, ama waa in uu ka shaqeeyo ganacsi ama hay'ad ku taal xaafadda.
- 2) Sidee ayay xubnaha bulshada loo ogol yahay ay codkooda u siin karaan musharaxiinta Guddiga Agaasimahaha loo ogol yahay?**
- a) Haddii aad xaq u yeelatid, xubnaha bulshada waxay codkooda u baxsan karaan siyaabaha soo socda:
    - i. Buuxinta warqadda cod bixinta internetka waxaa laga helaa  
<https://www.pppna.org/board-election>. Cod bixinta hore iyo cod bixinta maqanaha waxaa la dhamaystiri karaa ilaa maalinta Qamiista, 8<sup>da</sup> Oktoobar, subaxnimada 10 am. Cod bixinta internetka waxaa dib loo furi doonaa waqtiga ku habboon Shirka Sannadka kaddib marka la fududeeyo magacaabidda ay soo jeediyaa ka-qeybgaleyaasha laguna darro warqadda cod bixinta internetka.
    - ii. In la qabto waqtii la soo maro xafiiska PPNA si loo buuxiyo koobiga warqadda cod bixinta. Waxaa la qabsan karaa waqtii lagu buuxiyo koobiga warqadda cod bixinta ilaa maalinta Arbacada, 7<sup>da</sup> Oktoobar, ugu dambayn 4 pm.
- 3) Intee xubin ka tirsan guddiga ayaan u coddeyn karaa?**
- a) Haddii aad xaq u yeelatid, waxaad codkaada siin kartaa iskudarka tirada la soo magacaabay oo la'eg iskudarka tirada kuraasta guddiga loo baahan yahay in la buuxiyo. Tirada kuraasta banaan guddiga waxaa lagu tilmaami doonaa warqadda cod bixinta.
- 4) Ma baddali karaa codkeyga?**
- a) Haa. Haddii aad buuxisid warqadaada cod bixinta muddada cod bixinta hore ama cod bixinta maqanaha, waxaad codkaada ku baxsan kartaa warqad cusub waqtigaas. Waxaad kaloo codkaada ku dhiibban kartaa warqad cusub waqtiga ku habboon inta lagu dhexjiyo Isu Imaashada Sannadka ee 8<sup>da</sup> Oktoobar. Waxaad u baahan doontaa in aad isticmaashid isla nambarka telefoonka iyo cinwaanka si aad u hubsatid in la baddalo diiwaankaada cod bixinta la soo dhaafay.
  - b) Haddii aad dhiibatid dhowr warqadaha cod bixinta inta lagu dhix jiro waqtiyada ogolaashada, xullashada warqadda cod bixinta keliya ee la tirin doono waxaa laga soo qaadaa warqadaada cod bixinta ugu dambaysay haddii loo garto in la ogolaado.
- 5) Maxaa sababi kara in la diido warqadda cod bixinteyda?**
- a) Haddii cinwaanka saxsan aad adiga gelisid warqadaada cod bixinta uusan soo gelin xuduudda xaafadda Powderhorn Park Neighborhood (Lake Street, Chicago Avenue, 38th Street and Cedar Avenue)
  - b) Haddii aad dooratid musharaxiin ka badan tirada kuraasta banaan, tani waxay dhallin doontaa in cod bixintaada la soo diido. Lama tirin doono.
- 6) Maxay tahay tallaabada (tallaabooyinka) la qaado si loo xaqijiyo xaq u yeelashada ka tirsanaanta guud si loo coddeeyo?**



**Guddiga Agaasimeyaasha**  
**Warqadda Xaqiiqada Doorashada 2020**

---

- a) Shaqaalaha PPNA waxay xaq u yeelashada xubinimada guud ku saleysan cinwaanka ku qoran sida qeyb ka tirsan maclumaaadka ku qoran warqadda cod bixinta musharaxa guddiga. Shaqaalaha waxay xaqijiyaan in cinwaanka soo galo xuduudda xaafadda Powderhorn Park.

**XAQIIQADAH AHSWA GUUD**

- 1) Ma u coddeyn karaa dadka kale ee ka tirsan reerkeyga?**

- a) Maya

- 2) Sidee ayay dadka ka tirsan isla hal qoys u bixin karaan codkooda?**

- a) Haddii ay xaq u yeeshaan, dadka wadaaga cinwaan waxay dhiibban karaan codkooda maxaa yeelay waxaa kaloo la rabaa nambar telefoon gaar ah, taasoo qeyb ka ah maclumaaadka laga soo aruuriyay warqadda cod bixinta musharaxa guddiga cod bixiyaha. Nambarka telefoonka gaarka waxaa la siiyaa qofka, lama siiyo reerka.

- 3) Yaa tiriyo oo xaqijiyo codeynta?**

- a) Madaxa Guddiga PPNA wuxuu labo ka mid ah Guddiga Agaasimeyaasha PPNA aan iminka doonin in dib loo doorto, in ay tiriyaan cod bixinta la ogol yahay ee ku jirta faylka xogta laga soo qaaday xogta ururka.
- b) Guddiga Agaasimeyaasha la soo xullay ee dhamaystira tirinta wuxuu natijada la qeybsadaa Madaxa Guddiga iyo Agaasimaha Fullinta kaasoo natijada la qeybsada dhamaan dadka la magacaabay ee xaqa u yeesha.
- c) Kaddib marka la ogeysiyo kuwa la magacaabay ee ka tirsan guddiga lana ogolaado, shaqaalaha ururka waxay maclumaaad siin doonaan dadweynaha guud iyaga oo adeegsanaaya khadadka isgaarsiinta kala duwan.

- 4) Maxaa dhaca haddii aan u baahdo qoraalada doorashada oo ku qoran luqad kale?**

- a) Wuxaad isticmaali kartaa tarjamada luqadda ee laga helo bogga internetka PPNA si aad u aragtid qoraalka bogga internetka oo loo tarjamay Isbanish iyo Soomaali. Haddii aad u baahan tahay in maclumaaadka laguugu tarjamo luqad kale, fadlan nagala soo xariir [info@ppna.org](mailto:info@ppna.org) si aad u heshid kaalmo.